


Dumar badan waxay qabaan cudurka Myome. Waa barar ama nabar kuusan, mana aha Canser. Wuxuu ku dhashaa Raximka meelo kamid ah: sawirkan ayaana laga arki karaa:

Raximka ama ilma galeenka



Sababta:

cidna ma garanayso muxuu ka dhashaa Myome. Lakin waxaa cad in hormunka dumarku yahay meesha uu ku dhasho Myome.

Cabashooyinka:

Myome intiisa badan ma keeno xanuun, in ladaaweeyana qasab ma aha.

Hadii **dhiiga caadadu badan yahay ama dheerado**, sababtu waxay noqon kartaa Myome. Waxaana muhiim ah inuu dhakhtar ku baaro, si uu u ogaado in dhiigaago xadiid/ bir ku filan haysto. Hadii kale waa inaad qaadato kiniinka xadiidka.

Myome weyn wuxuu keeni karaa xanuunada soo socda: inay riixdo xiidmaha cunta mareenka, dhabar iyo lugo xanuun, caloosha oo istaagta ama degdegga Kaadida. Jimicsiga Jirka, Isboortiga ama xitaa Galmada waxay siyaadiin kartaa xanuunka.

Uurka:

waxaa dhici kara inuu Myome qofku qabo, uura yeesho. Mararka qaarkod Myome wuxuu badalaa Raximka xuubkiisii kor uqaado. Markaana waxaa caqli ah in Myome la jaro, uurka kahor, hadii kale uurku wuu adkaan karaa.

Caadada guurta:

Waa mudo dhowr sanado ah. Waxayna bilaabaan dhowr sano ka hor inta uusan dhiigu istaagin. Kadib marka Caadada guurta majro Myome cusub ee kora. Sidaa daraadeed, Dumarka ka hor ama waqtiga Cillad darrada, Suáasha waa: Calaamadaha sida ay u xoogsan yihiin Cabashooyinka? Suuragal matahay sanadaha soo socda in sii wanaagsan loo noolaado? Mise daaweyn hadda loo baahan yahay?

Mararka qaarkod waxaa ku filan haday dumarkii cunto cafimaad leh cunto, sidoo kale shaaha dabiiciga ah. Waxaa kaloo xanuunka celiya socodka iyo dhaqdhaqaaq jirka sida: oradka fudud, niikinta caloosha, ama lugaha, ama qabayska oo lagu nasto, lagu raaxaysto.

Waxaa jira qaybo hormunada kamid ah oo joojin kara xanuunka Myome inuu koro. Waxaa kaloo jira qalitaano kala duduwan oo lasamayn karo. Qalitankana waxaa xadaynaya meesha uu ku yaalo cudurka Myome iyo inta uu la egyahay. Inta badan waxaa dhacda in Myome-gii lajaro Raximkiina la dhaafo.

Haweenka qaarkod, dhakhtarku wuxuu ku dhihi karaa in Raximka la gooyo. Taasina waa wax dhici kara. Lakin inta badan qasab ma aha. Markaana waxaad talo weydiin kartaa dhakhtar kale ama qof kale oo arinta fahmaya.

Qoraa: Karin Schönig, Xarunta caafimaadka Haweenka München.

Halkan waxaad kaheli kartaa talo bixin gaar ah, laguuna tarjumayo: www.fgz-muc.de

Waxaana jira [buug ka hadlaya Myome](#) oo af jarmal ku qoran. Kafaad: Techniker Krankenkasse